Australian Government

Department of Immigration and Border Protection

Nolosha gudaha Australiya

Xeerarka iyo qiimayaasha Australiya

XUQUUQ XIFADAN

© Commonwealth of Australia 2016

Marka laga reebo Gacmaha Jaakada, dhammaan alaabta lagu soo bandhigayo daabacaadaan waxaa lagu bixiyey si waafaqsan *Aqoonsiga Meelaha guud ee Hal abuurka3.0 Laysanka Australia* (*Laysanka Guud ee Hal abuurka*).

Sida dawlada dhexe ay door bideyso waa inaad u aragto daabacaadan (iyo wixii alaab ah ee laga helay) adoo isticmaalaya erayadaan soo socda: *Ilaha: Waxaa laysanka laga helay Dawlada Dhexe ee Australia sida waafaqsan Aqoonsiga Meelaha guud ee Hal abuurka3.0 Laysanka Australia. Dawlada dhexe ee Australia looma baahna inay aqoonsato waxa warqadan ku jira*.

Shuruudaha waafaqsan ee Coat of Arms loo isticmaali karaa waxay ku faahfaahsan yihiin link -ga sharafta.

ISBN 978 1 920996 53 6

Daabacaaddan waxaa sidoo kale laga helayaa bogga internteetka www.border.gov.au

Calaamadda Turjumaanka waa calaamadda macluumaadka dadweynaha ee qaranka oo uu sameeyey Xafiiska Arimaha Dhaqamadda badan ee Victoria iyagoo la shirkoobaya Dawladdaha Trritory-ga, Gobolka iyo ta Dhexe. Calaamaddu waxay bixisaa si sahlan oo lagu tilmaamayo meesha dadka ku hadalka Ingiriiskoodu uu xaddidan yahay oo weydiisan kara caawimaada luuqada markay isticmaalayaan adeegyada dawlada.

Waxaa laga yaabaa inaad ku aragto calaamadda meelo bixiya adeegyada, macluumaadka bulshada iyo dawlada sida isbitaalada dawlada, saldhigyada boliiska, dugsiyada gobolka, xarumaha bulshada, xafiisyada shaqada iyo guriyeynta, golayaasha dawladda hoose iyo xarumaha ilaha macluumaadka soogalootiga.

Calaamadda Turjumaanka waxaa si rasmi ah loogu daahfurey Victoria Maajo dhexdeeda 2006.

Tusmada

Macluumaadka aasaasiga ah 4

Qoraalka Qiimayaasha Australiya 4

Qoraalka Qiimayaasha Australiya ee codsadayaasha visaha joogtada ah iyo ka ku meelgaarka ah 5

Qoraalka Qiimayaasha Australiya ee loogutalagalay codsadayaasha visaha ku meelgaarka ah 6

Xeerarka iyo Qiimayaasha Australiya 7

- Xoriyadaha aasaasiga ah 7
- Xushmada qiimaha iskumidka ah, sharafta iyo xoriyada shakhsiga 7
- Xoriyada haddalka 7
- Dawlad cilmaani ah iyo xoriyada diinta 8
- Xoriyadda xiriirka 8
- Taageerada diimuqraatiyada baarlamaanka iyo xukunka sharciga 8
- Sinnaanta sharciga waafaqsan 8
- Sinnaanta dumarka iyo ragga 9
- U sinnaanta fursada iyo xammaasada kala sareyn la' aanta 9
- Nabadgelyo badnida 9
- Qiimayaasha la wadaago 10

Bulshada Australiya ee maanta 10

- Caaddooyinka bulshada iyo sharciga 10
- Shuruudaha asluubta 11
- Xuquuqda goobta shaqada Australiya 11

Macluumaad dheeraad ah 12

Macluumaadka aasaasiga ah

Macluumaadkan waxaa loogu talagalay dadka codsanaya visaha si ay ugu noolaadaan Australia, midkood si joogta ah ama si ku meelgaar ah. Waxay bixisaa dulmar guud oo Australia ku saabsan, taariikhdeeda, hab nololeedkeeda iyo qiimayaasha aynu wadaagno.

Markaad dalbaneyso fiisooyin la xulay, codsiilayaasha da'doodu tahay 18 sanno iyo wixii ka weyn waxaa looga baahan yahay inay saxiixaan Qoraalka Qiimayaasha Australiya iyagoo caddeynaya inay xushmeyn doonaan qiimaha australia oo ay adeecaan shuruucda Australia.

Qiimayaasha Australia waxaa ka mid ah:

- xushmada qiimaha iskumidka ah, sharafta iyo xoriyada shakhsiga
- xoriyadda hadalka
- dawlad cilmaani ah iyo xoriyada diinta
- xoriyada xiriirka
- taageerada diimuqraatiyada baarlamaanka iyo xukunka sharciga
- sinnaanta sharciga waafaqsan
- sinnaanta dumarka iyo ragga
- u sinnaanta fusrada
- nabad badnida
- xushmada kala sareyn la'aanta ee wadata dulqaadka, xushmada labada dhinac ah iyo naxariista kuwa baahoon.

Qiimayaashan waxaa laga yaabaa inay u muujiyaan siyaalo kala duwan dad kala duwan iyadoo weli la ilaalinayo isku micno. Ma aha wax gaar u ah australiya, laakiinse leh heshiiska bulsho oo balaadhan oo taageera dhaqanka iyo bulshada Australiya.

Qoraalka qiimayaasha waxaa ka mid ah badiba foomamka codsiga visaha midkood su'aal ahaan ama ka qayb ahaan caddeynta.

Ka hor intaadan saxiixin su'aasha qoraalka qiimayaasha ee foomka codsiga, dhammaan codsadayaasha tiro yar oo fiisayaal ah, kuwa joogtada ah iyo kuwa ku meelgaarka ah waxaa looga baahan yahay inay akhriyeen, ama loo sharxay iyaga, macluumaadka ku saabsan qiimayaasha ay bixisay Dawlada Australiya. Macluumaadkan hoose waxaa loogu talagalay inuu caawiyo codsadayaasha fiisaha inay fahmaan qiimayaasha Australiya ka hor intayan saxiixin qoraalka qiimayaasha ee codsigooda fiisaha.

Qoraalka Qiimayaasha Australiya

Codsadayaasha tiro yar oo fiisayaasha ku meelgaarka ah, ku joogtada ah, iyo kuwa ku meelgaarka ah waxaa looga baahan yahay inay akhriyeen, ama loo sharxay, qalabka ay diyaarisay dawladda Australiya ee ku saabsan nolosha Australiya. Codsadayaasha waxaa sidoo kale la weydiinaya inay fahmaan waxa laga yaabo in laga doonayo haddii ay dib ka dalbadaan dhalashada Australiya. Qoraalkan waxaa ka mid ah foomamka codsiga visa ee ay saameysay iyo dhammaan codsadayaasha da'doodu tahay 18 jir am aka weyn inay u baahan doonaan inay saxiixaan qoraalkan.

Qoraalka Qiimayaasha Australiya ee codsadayaasha fiisaha joogtada ah iyo ka ku meelgaarka ah

Waa inaad saxiixdaa qoraalkan haddii da'daadu tahay 18 sanno ama ka weyn.

Waxaan caddeynayaa inaan akhriyey, ama lay akhriyey, macluumaadka ay ka bixisay Dawlada Australiya qiimayaasha iyo bulshada Australiya.

Waxaan fahmay:

- *qiimayaasha bulshada Australiya waxay xushmeysaa xushmada iyo xoriyada shakhsiga, xoriyada diinta, ka go'naanta xukunka sharciga, diimuqraadiyada baarlamaanka, sinnaanta ragga iyo dumarka iyo xamaasada kala sareyn la'aanta xambaarta xushmada labada dhinac ah, dulqaadka, naxariista iyo cadaalad sameynta kuwa u baahaniyo raadinta wanaaga dadweynaha.*
- *Bulshada Australiya waxay qiimeysaa sinnaanta fursada shakhsiyaalka, iyadoon loo eegaynin jinsigooda, diinta ama asal ahaan meshay ka soo jeedaan*
- *Luuqada Ingiriiska, luuqada qaranka ahaan, waa qodob muhiim ah oo mideynaya bulshada Australiya.*

Waxaan ballan qaadayaa inaan xushmeeyo qiimayaashan bulshada Australiya intaan Australiya joogo iyo inaan adeeco shuruucda Australiya.

Waxaan fahamsa nahay, haddii aan doonto inaan noqdo muwaadin Australian ah:

- *Muwaadinnimada Australiya waa aqoonsi la wadaago, iskuxidh guud oo mideynaya dhammaan Australiyaanka iyagoo xushmeynaya kala duwanaanshahooda.*
- *Muwaadinimada Australiya waxay ku lug leedahay masuuliyaad iyo xuquuq labada dhinacba ah. Masuuliyadda muwaadinka Australiyaanka ah waxaa ka mid ah adeecida shuruucda Australiya, oo ay ku jiraan kuwa la xiriira coddeynta doorashooyinka iyo ka shaqeynta xeerbeegtida.*

Haddii aan fuliyo aqoonsiga aan ku noqonayo muwaadin Australiyaan ah oo la ogolaado aqoonsigeyga waxaan fahmay in layga rabbo inaan siino daacadnimadeyda Australiya iyo dadkeeda.

Wixii ah codsiyada interneetka, madaxa codsadaha fiisaha waxaa la weydiin doona inuu doorto baton uu ku tilmaamayo midkood 'haa'ama 'maya' qoraalka qiimayaasha. Haddii codsiga ay ku jiraan ku tiirsanayaal da'doodu tahay 18 sanno am aka weyn, waxaa jira qormo dheeraad ah oo ku jirta qoraalka una akhrisanta:

Dhammaan dadka kale ee ku jira codsigan, ee da'doodu tahay 18 sanno ama ka weyn, waxay ii sheegeen inay akhriyeen , ama loo akhriyey, macluumaad ay ka bixisay Dawladda Australiya qiimayaasha iyo bulshada Australiya waxaana ogolaaday qoraalka kore.

Xaaladahaan codsaduhu wuxuu sameynayaa qoraal isagoo metelaya nafsadooda iyo dadka ku tiirsanba.

Qoraalka Qiimayaasha Australiya ee codsadayaasha fiisaha ku meelgaarka ah

Codsadayaasha ay saameyso fiisayaasha ku meelgaarka ah waa inay sidoo kale saxiixaan Qoraalka Qiimayaasha Australiya. Qoraalkoodu wuxuu ku jira qaybta caddeynta guud ee codsigooda, saadaraadeed saxiixida foomka codsigu micnaheedu waa in qoraalka qiimayaashu in sidoo kale la saxiixay. Codsadayaashan lagama dooni doono inay akhriyaan macluumaadkan, laakiinse sidaas way sameyn karaan haddii ay jecel yihiin.

Qoraalka soo socda ee Qiimayaasha Australiya wuxuu ku jiraa madiba foomamka codsiga fiisaha ku meelgaarka ah:

Waxaan xushmeynayaa qiimayaasha Australiyaanka sida ku qoran foomkan, intaan joogo Australiya waxaana adeeci doonnaa shuruucda Australiya.

Codsiyada interneetka ah, qoraalku wax yar ayuu ka duwan yahay:

Waxaan xushmeyn doona qiimayaasha Australiya sida ku qoran bilowga codsigan, intaan joogo Australiya waxaana adeeci doona shuruucda Australiya.

Codsiyada interneetka halkay jiraan ku tiirsanayaal jira 18 sanno ama ka weyn, waxaa ku jira qormo dheeraad ah qoraalka oo akhriskeedu yahay:

Dhammaan dadka kale oo dhan ee ku jira codsigaan ee da'doodu tahay 18 sanno ama ka weyn, waxay ii sheegeen inay sidoo kale ogol yihiin shuruudaan.

Codsadayaasha waxaa la weydiin doona inay doortaan batoonka si ay u tilmaamaan midkood 'haa'ama 'maya' caddeynta qoraalka qiimayaasha iyagoo nafsadooda metelaya iyo wixii ku tiirsan iyaga (haddii ay khuseyso).

Xeerarka iyo Qiimayaasha Australiya

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan mowduucyo khaas ah, gal boggaga interneetka ee khuseeya iyo ilaha kale ee la taxay.

Markay wadaagaan ilaa had dalal kale oo badan, xeerarkaan iyo qiimayaashaan loo qaatay qaabka gaarka ah, loo qaabeeyey laguna casriyeeyey dib u dejinta Australia malaayiin dad a oo ka kala yimd aduunka oo dhan. Inkastoo taas laga yaabo inay u kala sharxaan siyaalo kala duwan dad kala duwani, micnahoodu wuxuu ahaanayaa mid isku mid ah.

Deganayaashii koowaad ee Australia waxay ahaayeen dadka Aboorjuniis iyo Torres Strait Islander, oo dhaqankooda gaarka ahi iyo caadooyinkooda ay ka mid yihiin kuwa ugu da' da weyn aduunka. Soogalootigii ugu horeeyey waxay badanaa ka yimaadeen Ingiriiska, Ireland iyo hidahan Anglo–Celtic wuxuu ahaa mid muhiim ah oo ahaa mid ku leh saameyn joogta ah taariikhda Australia, dhaqanka iyo caadooyinka siyaasadeed. Hirar isdaba socda ayaa waxay keeneen dad muhaajiriin Afrikaan ah, eeshiyaan ah, Ameerikaan iyo yurubiyaan, kuwaas oo dhammaantood si gaar ah wax uga geystay Australia iyo hab nololeedkeeda.

Qoraalkan leh xeerarka iyo qiimayaasha la wadaago kama raadinayo inuu ka dhigo qof kasta isku mid isku wax rumeysan. Ujeedadu waa in la caawiyo degenayaasha cusub inay fahmaan qiimayaasha aasaasiga ah ee caawiyey inay abuuraan bulsho degan laakiinse isla markaaba ah mid firfircoon; isheysata laakiinse weli kala duwan.

Australia dhexdeeda, dadka waxay leeyihiin xoriyado fara badan. Si kastaba ha ahaatee, iyadoo xoriyadahaan laga faa' iideysanayo, qof walba waxaa laga rabaa inuu adeeco shuruucda Australia, ee uu meel dhigay dawlado is diimuqraadiyad leh ay ugu doorteen ilaalinta bulsho ammaan ah xor ah oo nidaamsan.

Xoriyadaha aasaasiga ah

Dhammaan dadka Australiyaanka ah waxay xaq u leeyihiin tiro xoriyado aasaasi ah (ilaa hadka sharciga), oo ay ka mid yihiin u hadlida six or ah oo furan, ku biirida jamciyadaha, shirar qabashada, caabudida diimaha ay doorteen Australiya oo dhan ku dhex safrida xannibaado la' aan.

Xushmada qiimaha siman, sharafta iyo xoriyada shakhsiga

Dhammaan dadka Australiyaanka ahi waa xor waana siman yihiin waxaana laga filayaa inay isula dhaqmaan si xushmad iyo sharafba le. Dadka Australiyaanka ah way diidaan u isticmaalka xoogga dagaalka leh, cabsi gelinta ama ceebeynta sidii hab lagu xalinayo isafgaranwaaga bulshadeena.

Shuruucda Dawladda dhexe waxay mamnuucaan kala soocida aasaaskeedu yahay jinsiyada, jinsiga, iinta iyo da'da meelo badan oo ah nolosha dadweynaha sida waafaqsan Xeerka Kala soocida Jinsiyadeed ee 1975*, Xeerka Kala soocida JInsiga 1984, Xeerka Kala soocida Iinta ee 1992 iyo Xeerka Kala soocida Da' da 2004. Guddiga Xuquuqaha bani' aadamka Australiya ayaa masuul ka ah maareynta cabashooyinka waafaqsan shuruucdaan*.

Eeg: Guddiga Xuquuqaha Bani' aadamka Australiya

Xoriyada hadalka

Dhammaan dadka Australiyaanka ahi waa xor, sharciga dhexdiisa, inay yiraahdaan ama qoraan siday u arkaan dawladaha Australiya ama ujeedadii kale ama arimaha bulshada ilaa inaysan

khatar gelineynin dadka, aysan sameynaynin dacwad been ah ama aysan hor istaagaynin xoriyada hadalka ee kuwa kale.

Isla taas ayaa khuseysa wargeysyada Australiya, telefishinka, raadyaha iyo noocyada kale ee isgaarsiinta. Dadka Australiyaanku waxay xor u yihiin inay ka diidaan falalka dawlada iyo inay u ololeeyaan inay bedelaan shuruucda.

Xoriyada hadalku waxay u ogolaanaysaa dadku inay nafsad ahaantooda ka hadlaan oo ay kawada hadlaan fikradaha. Waxaa jira shuruuc ka ilaalisa shakhsiga magaciisa wanaagsan macluumaadka beenta ah ama beenta. Waxaa sidoo kale jira shuruuc ka soo horjeeda kicinta naceybka dadka kale sababtuna tahay dhaqankooda, jinsiyadooda ama asalkooda.

Xoriyada diinta iyo dawlada cilmaaniga ah

Dhammaan Australiyaanku waxay xor u yihiin raacida diintii ay doortaan, ilaa intuusan sameynteedu aysan jebin wax sharci Australiyaan ah. Australiyaanku waxay sidoo kale xor u yihiin inaysan raacin wax diin ah. U dulqaadasho la'aanta diinta wax la aqbalayo ma aha bulshada Australiyaanka ah dhexdeeda.

Australia waxay leedahay dawlad cilmaani ah- mana laha diin goboleed ama rasmi ah. Dawladuhu waxay ula dhaqmaan dhammaan muwaadaniinta kuwa siman iyadoon loo eegaynin diin.

Shuruucda diinta kuma laha boos sharci ah Australia gudaheeda iyo sharciyadaas kaliya uu gudbiyey baarlamaanka ayaa khuseeya, tusaale, arimaha furiinka. Qaar ka mid ah waxqabadka dhaqamadeed ama diimeed, sida gododle (uu qabo wax ka badan hal qof isku wakhti) waxay ka soo horjeedaa sharciga Australia gudaheeda.

Xoriyada ciddaad la xiriireyso

Iyadoo sharciga loo fiiraneyso, dadka Australiya waxay xor u yihiin inay isutagaan iyo inay u dacwoodaan dawlada ama wixii urur ah ee kale ilaa intuu diidistu ay tahay mid nabadgelyo badan mana waxyeelayso ama dhaawacdo wax dad ah amah anti. Xoriyada aad kula xiriireyso waxaa ka mid ah xariyada aad ugu biireyso ama inaadan ku biirin wax urur ah ama koox, haddii ay sharci tahay. Kooxahan iyo ururadaan waxaa ku jira xisbiyada siyaasada, ururada ganacsiga iyo kooxaha bulshada.

Taageerada diimuqraadiyada baarlamaanka iyo xeerka sharciga

Australiya waa dimuqraadiyada baarlamaanka, oomicnaheedu yahay in muwaadiniinta Australia ka qayb galaan sida dalka loo maamulayo iyo wakiil looga noqonayo bulshada Australiyaanka ah. Dawladuhu waxay dhammaan la xisaabtamaya dhammaan dadka Australiyaanka ah. Baarlamaanada la doortay waa hay'adaha kaliya ee awood u leh inay sharci ka sameeyaan Australia ama u gudbiyaan awooda ay sharci ku sameyn lahaayeen kuwo kale.

Qof kasta oo Australia jooga waa inuu adeecaa sharciga ay dejiyeen dawladuhu. Si siman, dhammaan dadka Australiyaanka ahi waxaa ilaalinaya xeerka sharciga. Tan micnaheedu waxaa weeye inaan qofna laga dhaafeynin ama 'sharciga uusan ka sareyn', xitaa dadka haya boosaska awooda, sida siyaasiyiinka ama boliiska.

Sinnaanta sharciga waafaqsan

Sida sharciga waafaqsan dhammaan dadka australiyaanka ashi waa siman yihiin. Tan micnaheedu waxaa weeye inaan cidna loola dhaqmin si ka duwan cidkale sababtuna tahay jinsiyadooda, jaaliyadooda ama dalkay asal ahaan u dhasheen; da'dooda awgeed, jinsiga,

xaaladooda guur ama iineed; ama sababtoo ah diinta ama siyaasada ay rumeysan yihiin. Wakaaladaha dawlada iyo maxkamadaha madaxa bannaan waa inay qof kasta ula dhaqmaan si caddaalad ah.

In si cadaalad ah laguula dhaqmo micnaheedu waxaa weeye shaqa helida ama in lagu dalacsiiyo iyadoo lagu saleynayo qofka xirfadihiisa, awoodiisa iyo khibrada, oo aan lagu saleyn asalka dhaqankooda ama siyaasad ahaan waxay rumeysan yihiin. Sidoo kale micnaheedu wuxuu yahay inaan dadka loo diidi Karin adeeg dukaan dhexdiis ama hotel ama tasiilaad kale oo adeeg sababtuna tahay jinsiyadooda, midabkooda, diintooda, jinsigooda ama xaaladooda guur.

Sinnaanta Dumarka iyo ragga

Dumarka iyo raggu waxay ku leeyihiin Australia dhexdeeda xuquuq isku mid ah. Shaqooyinka iyo mihnaduhu waxay ugu furan yihiin si siman ragga iyo dumarka. Dumarka iyo ragga waxay ka shaqeyn karaan ciidamada labadoodubana waxay jagooyin ka qaban karaan dawlada.

Sinnaanta fursada iyo xamaasada kala sareyn la’ aanta

Dadka Australiyaanku waxay qiimeeyaan sinnaanta fursada iyo waxa badanaa loogu yeero ‘fursad caddaalad ah siin’. Tan micnaheedu waxaa weeye in waxa qof uu ku kasbado noloshiisa waa inay noqotaa wax soo saarka kartidiisa, shaqadiisa iyo tamartiisa laakiinse aysan noqon dhalashadiisa ama feebar u sameynta.

Dadka Australiyaanku waxay leeyihiin xamaasad kala sareyn la’aan ah oo huwan xushmad laba dhinac ah, u adkeysi iyo caddaalad sameynta. Tan micnaheedu ma aha in qof waliba isku mid yihiin ama qof waliba leeyahay maal siman amah anti. Ujeedada waa in la hubiyaa inuusan jirin dabaqadoo toos ah oo lagu kala duwan yahay bulshada Australiyaanka dhexdeeda.

Nabad badni

Dadka Australiyaanka waxay ugu faannaan bulshadooda nabada badan. Waxay rumesan yihiin in isbedelku ku dhaco wadahadal, ka dhaadhicin nabadgelyo leh iyo nidaam diimuqraadi ah. Waxay diideen shaqaaqada dagaalka inay tahay si lagu bedelo dadka maskaxdooda ama sharciga.

Waxaa sii weheliya qiimayaashaan. Dadka Australiyaanka ahi waxay sidoo kale daba galaan wanaaga dadweynaha waxayna u hayaan naxariis kuwa baahida qaba. Waxaa jirta xamaasad bulshadeed xoog badan Australia gudaheeda dadka australiyaankuna waxay raadiyaan sidii ay u kor ugu qaadi lahaayeen u hagaajin lahaayeen bulshada ay ku dhex nool yihiin.

Dad badan oo Australiyaan ahi waxay wax ka geystaan bulshada nolol maalmeedkooda. Waxaa laga yaabaa inay tan ku muujiyaan daryeelida degaanka, gacan siinta iyo wakhtiyada qaarkoodna wada shaqeynta wakhtiyada loo baahan yahay iyadoo la raadinayo wanaaga dadweynaha.

Australiya waxay leedahay caaddo xoog badan oo ‘jaalnimo’, halkaas oo ay dadku siiyaan kuwa kale caawimaad iskaa ah, khaas ahaan kuwa dhibku heysto. Jaalku badanaa waa saaxiin laakiinse wuxuu sidoo kale noqon karaa xaaskaaga, lammaanahaaga, walaalkaa, walaashaa, gabadhaada ama wiilkaaga. Jaalku wuxuu sidoo kale noqon karaa qof gebi ahaanba kugu cusub. Waxaa sidoo kale jirta caaddo xoog badan oo ah adeega bulshada iyo iskaa wax u qabso ku shaqeynta.

Qiimayaasha kor lagu soo dulmaray kor ayaa loo qaaday waxaana ka wada hadlay dadka Australiyaanka ah sannado fara badan. Waxay caawiyeen Australia inay soo dhoweynso oo laysu dhexgalo si lagu guuleysto malaayiin dad ah oo ka soo jeeda kooxa jinsiyadeed badan caaddooyinka dhaqameed.

Dhaqamada kala duwan ee Australia waa xooga sameeya bulsho firfircoon. Australia's cultural diversity is a strength which makes for a dynamic society. Qaabka shuruucda Australia, dhammaan dadka Australiyaanka ah waxay xaq u leeyihiin inay sheegaan waxay rumeysan yihiin iyo dhaqankooda.

Laakiinse isla markaas, dhammaan dadka Australiyaanka waxaa la weydiinayaa inay sameeyaan ka go' naan dulmareysa Australia – shuruucdeeda, qiimayaasheeda iyo dadkeeda.

Qiimayaasha la wadaago

Inkastoo soogalootiga Australia ay ka soo jeedaan asalo diimeed iyo dhaqamo kala duwan, waxay si guul leh u degeen Australia oo ay isdhexgaleen jaaliyada balaaran, Australia , bedel ahaan, waxaa qani kadhigey wax ka geysiga ay sameeyeen bulsho, dhaqan iyo dhaqaale ahaan.

Waxa lagu garto oo muhiim ah ee dadka bulshada Australiya manta maaha ah oo kaliyda dhaqamada kala duwan ee dadkeeda, laakiinse ilaa xadka ay middeysan yihiin iyagoo dul maraya oo middeynaya ka go' naanta Australia. Dadka australiyaanku waxay dhinac iska dhigaan kala duwanaantooda shakhsiyadeed iyagoo eegaya danta ay ku wada noolaan lahaayeen deris ahaan.

Marka la eego qaabka shuruucda Australia d, dhammaan dadka Australiyaanka ah waxay xaq u leeyihiin inay sheegaan dhaqankooda iyo waxay rumeysan yihiin iyo inay si xor ah uga qaybgalaan nolosha Australiaanka. Islamarkaas, qofwalba waxaa laga filayaa inay hayaan qiimayaasha la wadaago iyo xeerarkaba, sida lagu soo dulmaray horudhaca, taas ayaa taageeraysa hab nololeedka australiya.

Bulshada Australiya ee maanta

Mid ka mid ah qaababka qeexaya dadka Australia ee maanta waa kala duwanaanta dhaqanka ee dadkeeda iyo ilaa xadkay middeysan yihiin iyagoo kahormarinaya mideysnaantooda ka go'an ee Australia.

Qaabkale oo qeexaya waa dabeecada kala sareyn la' aanta bulshada Australia. Tan micnaheedu ma aha in qof waliba isku mid yahay ama in qof waliba maal isku mid ah leeyahay amah anti. Waxay micnaheedu sidoo kale yahay in shaqo adag iyo ka go' naan, dadka xiriirka heerka sare ah leh ama macaamiisha wax bedeli karaa inay guulaysan karaan.

Qaabka sharciga Australia dhexdiisa, dhammaan dadka Australianka ahi waxay awoodaan inay sharxaan waxay rumeysan yihiin iyo dhaqankooda iyo inay si xor ah uga qaybgalaan nolosha qaranka. Australia waxay aad ugu dhegan tahay oo rumeysan tahay inaan qofna laga dhigin mid baahoon iyadoo lagu saleynayo dalkay ku dhasheen, hidaha dhaqankooda, luuqada, jinsiga ama diintay rumeysan yihiin.

Si loo ilaalyo bulsho barwaaqo ah, nabad badan oo degan, dadka Australiyaanka ah ee asal kasta ka soo jeeda waxaa laga filayaa inay ilaaliyaan qiimayaasha iyo xeerarka xoojinaya bulshada Australia.

Caaddooyinka bulshada iyo sharciga

Dabeecada bulshada Australia waxaa xukuma iskudarka caaddooyinka bulshada ee aan tooska ahayn iyo iskudarka shuruucda tooska ah.

Dhammaan dadka Australia waa inay adeecaan shuruucda qaranka ama ay wajahaan suurtagalnimada dacwada madaniga ah iyo dembiga ahba. Waxaa sidoo kale dadka laga filayaa inay guud ahaan ilaaliyaan caddooyinka bulshada Australia, siday wax u qabtaan iyo caaddadooda xitaa inkastoo aysan ahayn wax sharci ahaan ku qabanaya.

Shuruucda Australia waxaa sameeyey baarlamaanka territoryga, gobolka, iyo Dawlada dhexe. Booliisku wuxuu leeyahay shaqada ah ilaalinta nabada iyo nidaamka bulshada iyo inay keenaan maxkamada sharciga dadkay rumeysan yihiin inay jebiyeen sharciga. Dadku bulshooyinkooda dhexdooda iyo darisyadooda sidoo kale waa is caawiyaan lacala haddii dhib dhaco waxay u soo sheegaan wax kasta oo aan caaddi ahayn ama shaki leh saldhiga xaafadooda ee booliiska.

Australia waxay leedahay Booliiska federaala Australia, oo baara dembiyada shuruucda federaalka oo ay ka mid yihiin kala iibsiga daroogada, socdaalka sharcidarada ah, dembiyada nabbadsugida qaranka iyo dembiyada degaanka. Dhammaan gobolada Australia iyo Territory ga Waqooyi waxay leeyihiin ciidankooda booliis, oo ka shaqeeya dembiyada hoos yimaada shuruucda territory ga ama gobolka. Booliisgareynta Caasimada Australia waxaa masuuliyadeeda qaaday Booliiska Federaalka Australia.

Inkastoo saraakiisha booliisku laga yaabo inay dadka xiraan oo ay caddeyn geeyaan maxkamada, iyagu ma sameeyaan go' aanka ugu danbeeya ee ah in dadkau ay dembiile dembi yihiin iyo in kale. Tan waxaa go' aamiya maxkamadaha

Bulshooyinka iyo booliisku waxay leeyihiin Australia xiriir wanaagsan. Waxaad soo sheegi kartaa dembi oo aad caawimaad weydiisan kartaa booliiska. Haddii booliisku su' aalo ku weydiiyo, isdeji, edeb lahow lana shaqee.

Shuruudaha asluubta

Bulshada Australia waxay fileysaa in dhammaan dadka fiisaha heystaa raacaan sharciga Australia oo ay sii wadaan inay qanciyaan shuruuda asluubta ee fiisahooda. Qofka leh fal dembiyeed lagu xukumay, waxaa la rumeysan yahay inuu xiriir la leeyahay dembi, sida kooxda dembiilayaasha mootoleyda ama kooxaha argagixisada ah ama u leh khatar bulshada Australia ama shakhsi bulshada Australia dhexdooda jooga, waxaa ku dhici kara in laga qaado fiisahooda. Qof kasta oo ah ama laga yaabo inuu yahay mid khatar ku ah caafimaadka, ammaanka ama nidaamka wanaagsan ee Australia waxaa laga yaabaa in fiisahooda laga qaado.

Qofka fiisaha laga qaado waxaa laga yaabo in la xiro oo laga kaxeeyo Australia. Waxaana laga yaabaa in laga saaro, xaaladaha badidooda si joogta ah inuusan ugu soo noqon Australia.

Xuquuqda goobta shaqo ee Australia

Dadka ka shaqeeya Australia, oo ay ku jiraan labadaba kuwa fiisaha heysta ee wakiilka laga yahay iyo kuwa kaleba, waxay xuquuq iyo ilaalin ku leeyihiin shaqada. Taas kama qaadi karo heshiis.

Heerarka lacag bixinta ugu yar iyo xaaladaha shaqo waxaa dejiya sharciga Australia.

Bogga interneetka Ombudsman ka Shaqo u Sinnaanta Australia ee soogalootiga iyo kuwa fiisaha haysta ayaa siinaya macluumaadka waxaad u baahan tahay inaad ogaato ka hor intaadan shaqo bilaabin, heerka lacag siinta, qorshayaasha fasaxa iyo waxyaalaha shaqaaluhu xaqa u leeyahay.

Eeg: Soogalootiga & Kuwa fiisaha heysta

Ombudsman ka Shaqo u Sinnaanta ayaa ku siin kara tallo iyo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waajibaadkaaga iyo xuquuqdaada shaqo, waxayna leeyihiin macluumaad ka goobta shaqada oo lagu turjumay luuqado kala duwan.

Eeg: Ombudsman Shaqo u Sinnaanta

Wixii macluumaad dheeraad ah

Arimaha Degitaanka:

Macluumaadka waxaa laga helayaa Bogga Interneetka ee Wasaaradda Adeegyada Bulshada (DSS).

Buug yaraha Nolol ka bilaabida Australia waxaa sidoo kale laga helayaa bogga interneetka ee Wasaaradda Adeegyada Bulshada (oo lagu helayo Ingiriis iyo 37 luuqadood oo kale)

Codsadayaasha fiisaha ku meelgaarka badidooda, qoraalka qiimaha wuxuu ku jiraa qaybta caddeynta guud ee foomkooda codsiga.

Dadka hadda jooga dibeda Australia ee dalbanaya fiisaha bani' aadanimo waxaa laga doonayaa inay saxiixaan qoraalka qiimayaasha wakhtiga la wareysanayo. Codsadayaashan lagama filayo inay akhriyaan *macluumaadka xirriada kore,* maadaama wareysiga loogu sharxi doono wakhtiga wareysiga. Nidaamkan ka duwani wuxuu garowsanayaa xaaladaha adag ee ay wajahaan codsadayaasha fisiaha Bani'aadanimo ee jooga bannaanka Australiya.

Haddii lagugu ogolaado Barnaamijka Bani' aadanimada hoos imanaya ee bannaanka Australia, waxaa lagugu dhiirigelinayaa inaad tagtao barnaamijka Wacyigelinta Dhaqanka Australia (AUSCO) ka hor intaadan Australia soo aadin. Barnaamijku wuxuu bixiyaa macluumaad ku saabsan u soo safrida iyo degitaanka Australia waxaana lagu qabtaa meelo kala duwan oo ku yaal Aasiya, Afrika iyo Barriga Dhexe.

Waxaa jira kooxo yar oo ah fiisooyin oo aan u baahneyn inay aqoonsadaan Qoraalka Qiimayaasha Australia. Kooxdaan waxaa ka mid ah kumana koobna:

- Fiisooyinka booqashada
- Muwaadiniinta New Zealand ee ku soo gelaya Australia fiise nooc khaas ah oo ay ku jiraan kuwa heysta ama codsanaya fiise soo noqosho degene.